Casharka 30

1. Inkastoo Ilaah sagaal belaayo u soo diray Fircoon iyo reer Masar, miyaa Fircoon oggolaaday inay dadku tagaan?
-Maya.

2. Maxay ahayd belaayadii u dambaysay ee Ilaah soo diray?
-Waa belaayadii u dambaysay ee dhammaysay curadyadii dadka iyo looda.

3. Haddii la doonayo in reer binu Israa'iil ka badbaadaan belaayada, maxay ahayd waxa laga doonayey inay sameeyaan?
-Waxay ahayd inay amarka Rabbiga addeecaan.

4. Maxaa Ilaah ku amray reer binu Israa'iil inay sameeyaan, si curadyadooda aanay u dhiman?
-Waxay ahayd inay soo wataan orgi ama wan gu' jir ahoo aan wax iin ah lahayn.
-Waxay ahayd inay gowracaan wanka ama orgiga, oo dhiiggiisana ay weel u hooriyaan.
-Waxay ahayd inay dhiigga mariyaan fayaaradaha albaabbada guryahooda.
-Waxay kaloo ahayd inay guriga ku dhex jiraan, waa kan ay fayaaradihiisa mariyeen dhiigga.
-Weliba ma ahayn inay jebiyaan lafaha wanka ama orgiga ay habeenkaas guryahooda ku cunayaan.

5. Haddii reer binu Israa'iil ayan wax u samaynin sida Ilaah ka doonayey, maxaa ku dhacaya iyaga?
-Belaayada ayaa ku iman lahayd, oo waxaa dhiman lahaa curadyadooda xoolaha iyo kan dadka.



6. Miyaa Ilaah u oggolaanayaa dadka inuu ku badbaadiyo sida iyagu ay doorteen ama qaabkooda?
-Maya

7. Waa dariiqee kan keliya ee ina badbaadinaya?
-Waa dariiqa Rabbiga.

8. Haddii reer binu Israa'iil ay addeecaan amarrada Ilaah, waa maxay wixii Ilaah u ballan-qaaday inuu u sameeyo iyaga?
-Ilaah wuxuu ballanqaaday in iyaga aanay belaayo ku dhicin, iyo in curadyadooda ayan dhimanin.

9. Miyaa Ilaah wada laayey curadyadii reer Masar ee dadka iyo Xoolaha?
-Haa.

10. Miyaa mid ka mid ah curaydyada reer binu Israa'iil ee dadka iyo xoolaha la dilay?
-Maya.

11. Maxaa keenay in mid ka mid ah curaydyadii Israa'iil ee dadka iyo xoolaha aan la dilin?
-Waayo reer binu Israa'iil waxay addeeceen Rabbiga oo waxay dhiiggii neefka mariyeen afayaaradaha albaabkooda.

12. Maaddaama reer binu Israa'iil ay addeeceen Ilaah, miyaa Ilaah dhowray ballankiisii oo uu kormaray guryihii reer binu Israa'iil ay deggenaayeen?
-Haa.

13. Kaddib markii Fircoon wiilkiisii curadka ahaa iyo reer Masar oo dhan ay ka dhinteen curadyadoodii, muxuu Fircoon sameeyey?

-Fircoon dadkii buu u oggolaaday inay baxaan.

14. Miyaa Fircoon ama cid kale ay la dagaali kartaa Ilaah oo weliba ay guulaysan kartaa?
-Maya.

-Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil ka badbaadiyey dembigii addoonsiga, oo Fircoon wuxuu reer binu Israa'iil ka waday dhulkii Masar.

-Dalkee buu Ilaah ku hoggaaminayey reer Binu Israa'iil?

-Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil ku hoggaaminayey dhulkii Kancaan.

-Kancaan wuxuu ahaa dhulkii Ilaah u ballan-qaaday Ibraahim, Isxaaq, Yacquub, iyo weliba kuwii ay ka soo farcameen.

-Markii reer binu Israa'iil ay yimaadeen dhulka Masar, waxay ahaayeen 70 ruux.

-Haatan, kaddib markii reer binu Israa'iil ay soo degeen dhulka Masar, waxaa laga joogay 400 oo sannadood, oo tirsiga reer binu Israa'iilna wuxuu noqday laba milyan oo ruux ama qof.

-Sidee buu haddaba Ilaah ku awoodayaa inuu laba milyan oo qofood hoggaamiyo.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 13:21-22

21-Rabbiguna inuu iyaga jidka tuso aawadeed ayuu maalintii hortooda socon jiray isagoo ku jira tiir daruur ah,



habeenkiina tiir dab ah, inuu iyaga u iftiimiyo si ay u socdaan hadh iyo habeenba.

22-Tiirkii daruurta ahaa oo maalinta, iyo tiirkii dabka ahaa oo habeenka kama tegin dadka hortiisa.

-Sidee baa Ilaah u hoggaamiyey reer binu Israa'iil wakhtiga maalinnimada?

-Wuxuu ku hoggaamin jiray daruur sida tiir oo kale ah.

-Sidee baa Ilaah ku hoggaamin jiray reer binu Israa'iil wakhtiga habeennimada?

-Wuxuu ku hoggaamin jiray daruur dab ah oo ifin jirtay iyaga. marka ay safrayaan.

-Haddii Rabbigu aanu hoggaamin lahayn, miyey reer binu Israa'iil garan lahaayeen halka ay ku sii jeedaan/
-Maya.

-Haddii Ilaah aanu hoggaamin lahayn reer binu Israa'iil, maxaa iyaga ku dhici lahaa?

-Way lumi lahaayeen ama dhiman lahaayeen.

-Maaddaama Ilaah jecel yahay reer binu Israa'iil, wuxuu u hoggaamiyey iyaga si ayan u lumin oo u dhiman.

-Ilaah wuxuu hoggaamiyey reer binu Israa'iil ilaa ay soo gaaraan Badbba Cas.

-Markii ay Badda Cas soo gaareen, ayaa Ilaah u sheegay reer binu

Israa'iil inay qaddar hakadaan ama nastaan.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 14:1-3

1-Markaasaa Rabbigu la hadlay Muuse, oo wuxuu ku yidhi.
2-La hadal reer binu Israa'iil oo sheeg inay dib u soo noqdaan oo ay degaan meel ka horraysa Fiihaahiirot, oo u dhexaysa Migdol iyo badda, kana horraysa Bacal Sefoon Horteeda oo meel badda ag ah waa naad degtaan.
3-Oo Fircoon wuxuu ka sheegi doonaa reer binu Israa'iil, oo odhan doonaa Dhulkaa murgiyey, oo cidladaa xidhay iyagii.

-Maxaa Ilaah reer binu Israa'iil ugu hoggaamiyey meel ku dhow Badda Cas?

-Ilaah wuxuu doonayaa inuu tuso reer Masar iyo reer binu Israa'iil in Isaga kelidiis uu Ilaah yahay.

-Yaa u sheegay Ilaahwaxa Fircoon uu ka fakarayo?
-Ninna uma sheegin.

-Sidee buu Ilaah ku gartay waxa Fircoon qalbigiisa ku jira ama uu ka fakarayo?
-Ilaah wuxuu garanayaa fikir waliba ee dadka inta ayan ka fikiri.

-Bal aynu maqlano waxa Fircoon oranayo.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 14:5-9

5-Oo waxaa loo sheegay boqorkii Masar inay dadkii carareen; markaasaa Fircoon iyo addoommadiisii qalbigoodii wuxuu u rogmaday xagga dadka, oo waxay yidhaahdeen, Waxan



aynu samaynay waa maxay, oo maxaynu reer binu Israa'iil uga sii daynay adeegiddii ay inoo adeegi jreeen?
6-Markaasuu wuxuu diyaarsaday gaadhifaraskiisii, oo wuxuu watay dadkiisii.
7-Oo wuxuu kaxaystay lix boqol oo gaadhifaras ah oo la doortay, iyo gaadhifardoodkii Masar oo dhan, iyo saraakiil u sarraysa kulligood.
8-Markaasaa Rabbigu qallafiyey qalbigii boqorkii Masar oo Fircoon ahaa; kolkaasuu wuxuu raacdaystay reer binu Israa'iil; waayo, reer binu Israa'iil waxay ku bexeengacan sarraysa.
9-Markaasaa Masriyiintii iyagii raacdaysteen, Kulli fircoon fardihiisii iyo gaadhifardoodkiisii ood han, iyo fardooleydiisii, iyo ciidankiisii ayaa raacdeeyey, oo waxay gaadheen iyagoo deggan meel badda u dhow, oo Fiihaahiiroot dhicaneeda ah, kana horraysa Bacan Sifoon.

-Fircoon wuxuu ka fakarayey inuu reer binu Israa'iil haddana soo qabto.

-Markaasina Fircoon wuxuu isku duway ciidammadiisii, oo wuxuu soo daba galay reer binu Israa'iil si uu haddana u soo qabqabto.

-Yaa Fircoon hoggaaminayey marka uu doonayo inuu reer binu Israa'iil soo qabqabto?
-Shayddaanka.

-Maxaa Shayddaanku u doonayaa in Fircoon soo qabto reer binu Israa'iil?
-Shayddaanku wuxuu doonayaa inuu burburiyo Israa'iil.

-Maxay reer binu Israa'iil sameeyeen markii ay arkeen Fircoon iyo ciidammadiisa oo doonaya inuu soo qabqabto iyaga?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 14:10a & 11-12

10-Oo markii Fircoon soo dhowaaday, ayaa reer binu Israa'iil indhaha kor u taageen, oo waxay arkeen Masriyiintii oo soo daba socota; markaasay aad iyo aad u cabsadeen.

11-Oo wxay Muuse ku jyidhaahdeen, War ma xabaalaan jirin Masar, oo sidaa aawadeed aad noogu soo kaxaysay cidlada inaannu ku dhimanno? Maxaad sidan noogu gashay oo aad Masar nooga soo saartay?

12-Sow erayganu ma aha kii aannu kugula hadalnay Masar dhexdeeda, annagoo ku leh, isak kaaya daa, aannu Masriyiinta u adeegno, intii aannu cidlada ku dhiman lahayn.

-Reer binu Israa'iil waxay eedeeyeen Muuse, oo waxay ku yiraahdeen waxaa u roonayd inaanay dhulkii Masar ka soo tegin.

-Weliba reer binu Israa'iil waxay arkeen Ilaah oo toban belaayo ku dhufanaya dhulkii Masar, welina Ilaah ma ayan rumaysan siday u badnaayeen.

-Reer binu Israa'iil ma ayan rumaynin Ilaah, laakiin Muuse wuxuu rumaysnaa Ilaah.
-Tani waa wixii Muuse uu ku yiri reer binu Israa'iil:

Bal aynu akhrinno Baxniintii 14:13-14

13-Markaasaa Muuse wuxuu dadkii ku yidhi, War ha cabsanina, oo iska taagnaada, oo bal arka badbaadada uu Rabbigu maanta idiin samayn doono; waayo, Masriyiinta aad maanta aragteen, weligiin mar dambe ma arki doontaan.

14-Oo Rabbigu aawadiin buu u diriri doonaa, oo idinku waa inaad iska aamusnaataan.



-Miyaa reer binu Israa'iil ay awoodeen inay is-badbaadiyaan?
-Maya.

-Maxay reer binu Israa'iil u awoodi waayeen inay is-badbaadiyaan?

-Waxaa hortooda ah BAdda Cas, laba buurood oo waaweynna dhinacyada ayey ka jiraan, oo Fircoon iyo ciidammadiina way ka dambeeyaan.

-Reer binu Israa'iil meel waliba waa laga jiray.

-Haddaba waa kuma kan keliya ee awood u lahaa inuu reer binu Israa'iil Badbaadiyo?
-Ilaah.

-Markii Aadan iyo Xaawo laga saaray Beer Ceeden, way awoodi kari waayeen inay ku noqdaan Beer Ceeden.

-Ilaah oo keliya ayaa awooday inuu iyaga siiyo waddo ay ku badbaadaan.

-Markii cagihii iyo lugihii Isxaaq la xirxiray, oo Ibraahim billaabay inuu wiilkiisa gowraco, Isxaaq si uu isku badbaadin karay ma lahayn.

-Ilaah oo keliya ayaa siiyey isaga dariiq uu ku badbaado.

-Haatan reer binu Israa'iil dabin ayey galeen, oo awoodna uma lahayn ay isku badbaadin karaan.

-Ilaah oo keliya ayaa awood u lahaa inuu siiyo iyaga dariiq ay ku

bxsadaan reer binu Israa'iil.

-Isla sidii Ilaah oo keliya uu u awooday inuu reer binu Israa'iil bixiyo, ayaa adigana Ilaah oo keliya ku siin kraa waddo aad ku badbaaddo.

-Miyaa Ilaahkeenay dariiq reer binu Iraa'iil ay ku badbaadaan?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 14:21-22

21-Markaasaa Muuse gacantii baddii ku kor fidiyey, oo habeenkii oo dhan Rabbigu wuxuu baddii dib ugu celiyey dabayl xoog Badan oo bari ka timid, oo wuxuu baddii ka dhigay dhul engegan, oo biyihiina way kala go'een.

22-Markaasaa reer binu Israa'iil baddii dhex mareen, oow axay ku socdeen dhul engegan, oo biyihiina waxay iyaguu u ahaayeen derbi xagga midigta iyo xagga bidixdaba.

-Ilaah wuxuu ku amray Badda Cas inay jid siiso reer binu Iraa'iil si ay kaga gudbaan badda iyagoo dhul engegan maraya.

-Maxaysan ugu adkaanin in Ilaah waddo ka dhex sameeyo Badda Cas?

-Waayo Ilaah baa abuuray Badda Cas.
-Waayo Ilaah waa Sayidka Badaha ood han.

-Waayo Ilaah waa Qaadir, oo wax walibana wuu samayn karaa?

-Reer binu Israa'iil waxay billaabeen inay ka dhex gudbaan Badda Cas.



-Maaddaama Fircoon iyo ciidammadiisu ay ku daba-jireen inay qabsadaan reer binu Israa'iil awgeed, maxaa Ilaah sameeyey si uu reer binu Israa'iil u badbaadiyo awgeed?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 14:19-20

19-Markaasaa malaa'igtii Ilaah oo hor socotay reer binu Iraa'iil soo wareegtay oo daba mmartay iyagii, markaasaa tiirkii daruurta ahaa ka soo hor wareegay oo uu daba maray iyagii.

20-Oo wuxuu kala dhex galay reer Masar iyo reer binu Israa'iil; oo waxaa jiray daruur iyo gudcur, laakiinse weliba habeennimadii wuu iftiimay; oo habeenkii oodhan midna uma soo dhowaan ka kale.

-Ilaah wuxuu kala dhex dhigay daruur Israa'iiliyiintii iyo Fircoon iyo ciidammadiisa.

-Druurta waxay u ifaysay sida Ilayska oo kale, ha yeeshee gudcur bay dhex dhigtay Fircoon iyo ciidammadiisa.

-Inkastoo daruurta ay gudcur dhex dhigtay Fircoon iyo ciidammadiisa, haddana weli reer Msar wxay daba dhigteen reer binu Israa'iil.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 14:23

23-Markaasaa Masriyiintii soo eryadeen, oo intay soo daba galeen ayay waxay mareen badda dhexdeeda, oo waxayna ahaayeen Fircoon fardihiisii iyo gaadhifardoodkiisii, iyo fardooleydiisii oodhan.

-Maxaa Ilaah sameeyey kaddib markii Fircoon iyo ciidammadiisu

soo daba galeen reer Binu Israa'iil oo dhex maraya Badda Cas?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 14:24-28

24-Oo mrkii waagii beryay waxaa dhacday in Rabbigu ciidankii Masriyiinta ka dhex fiiriyey tiirkii dabka ahaa iyo kii daruurta ahaa, kolkaasuu kadeeday ciidankii Masriyiinta.

25-Kolkaasuu giraangirihii gaadhifardoodkooda xidhay, inay si dhib leh u kexeeyaan, markaasay Masriyiintii waxay yidhaahdeen, Reer binu Israa'iil hortooda aynu ka cararno;waayo, Rabbiga waa u dirirayaa iyaga oo uga hiilinayaa Masriyiinta.

26-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yihdi, Badda gacanta ku kor fidi, inay biyuhu ku soo noqdaan Masriyiinta, iyo gaadhifardoodkooda, iyo fardooleydooda.

27-Markaasaa Muuse gacantii badda ku kor fidiyey, oo mrkii waagii beryay ayaa baddii xooggeedii hore ku soo noqotay, markaasaa Masriyiintiina ka carareen; kolkaasaa Rabbigu wuxuu Masriyiintii ku tuuray badda dhexdeedii.

28-Markaasaa biyihii isku soo noqdeen, oo waxay qariyeengaadhifardoodkii, iyo fardooleydii, iyo xataa ciidankii Fircoon oo dhanoo badda dhexdeeda reer binu Israa'iil ku eryaday, oo xataa midna kama hadhin.

-Ilaah wuxuu Fircoon iyo Ciidammadiisa ku dhex qarqiyey Badda Cas.

-Marka ay sidaas tahayna nin ka mid ah ciidankii fircoon ma badbaadin..

-Miyaa Fircoon Ilaah la dagaallamay oo uu adkaaday?
-Maya.



-Yaa Ilaah la dagaallami kara oo haddana guulaysan kara?
-Ninna.
-Miyaa qaar ka mid ah reer binu Israa'iil ay dhinteen?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 14:29-30

29-Laakiinse reer binu Israa'iil waxay ku socdeen dhul engegan oo badda dhexdeeda ah, biyihiina waxay iyagii u ahaayeen derbi xagga midigta iyo bidixdaba.

30-Oo sidaasaa Rabbigu reer binu Israa'iil uga badbaadiyey gcantii Msriyiinta; oo reer binu Israa'iilna waxay arkeen Masriyiintii oo dhimatay oo badda xeebteeda taal.

-Ma jirin ruux reer binu Israa'iil ah oo dhintay.
-Waa maxay asbaabta ay u dhiman waayeen reer binu Israa'iil?
-Waayo Ilaah baa iyaga difaacayey.

-Waa maxay asbaabta Ilaah u daafacay Israa'iil?

-Ilaah wuxuu u daafacay Israa'iil waxay ahayd inuu isagu u ballan-qaaday in Badbaadiyaha dunida uu ka sood hex bixi doono faraca Ibraahim iyo Israa'iil.

-Ilaah wuxuu kaloo u difaacayey reer binu Israa'iil ayaa waxay ahayd inuu iyaga soo mariyo Hadalladiisa Baybalka ee qaramada dunida loogu tala-galay Ibraahim iyo Israa'iil.

-Haddii aynu haddaba rumaysan nahay Ilaah, Ilaah baa ina badbaadinaya.

-Haddii aynaan Ilaah rumaysnayn, dee markaa Ilaah ina badbaadin maayo.